

TALO SHARCI

Waxaad codsan kartaa talo sharci oo bilaash ah inta lagu jiro habraaca Ilaalinta Caalamiga ah (International Protection). Tani waxay sidoo kale ku jirtaa caawinta gudbinta codsigaaga.

Talo sharci waxay ka dhigan tahay inaad heli karto sharaxaad ku saabsan:

- xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga
- habraacyada kala duwan
- arrimaha sharciga.

Talo sharci waxaa laga heli karaa **Citywest Convention Centre** iyadoo loo marayo **Legal Aid Board**.

Waa maxay Talo Sharci?

Talo sharci waxaa ku jira hagiid, macluumaad iyo caawimo la xiriirta codsigaaga iyo tallaabooyinka habraaca ee Ilaalinta Caalamiga ah. Kuma jirto bixinta talo sharci (legal advice).

Waa inaad ogaataa in:

- La-taliyayaasha sharcigu kuguma talin doonaan tallaabo gaar ah oo aad qaaddo.
- La-taliyayaasha sharcigu fikrad kama dhiiban doonaan codsigaaga.
- La-taliyayaasha sharcigu ma heli karaan faylkaaga mana qaadan doonaan faahfaahin gaar ah oo ku saabsan kiiskaaga.

Talo sharci waxay ka duwan tahay matalaadda sharciga waxayna dhammaanaysaa marka qareen loo magacaabo inuu ku siiyo talo sharci oo ku matalo.

Adeeggan waxaa bixiya la-taliyayaal sharci oo aan ahayn qareenno. Talo sharci iyo matalaad sharci (oo sidoo kale loo yaqaan legal aid) waxaa bixiya qareenno marka aad codsato kaalmo sharci. Waa inaad sida ugu dhakhsaha badan uga codsataa **Legal Aid Board** talo sharci iyo matalaad. Waxaad ka codsan kartaa kaalmo sharci **Citywest Convention Centre** ee **Legal Aid Board Citywest Counselling Service**, ama mid ka mid ah saddexda xarumood ee sharciga ee ku yaal: (1) Dublin (Smithfield), (2) Cork (Pope's Quay), iyo (3) Galway (Wood Quay).

Waa masuuliyaddaada inaad raadsato talo sharci.

Marxaladaha Talo Sharciga

Talo sharci waxaa lagu heli karaa laba marxaladood.

Marka koowaad:

1. Talo Sharci oo ku salaysan Fiidiyow

Fiidiyowyadu waxay sharxayaan waxa ay tahay talo sharci waxayna bixiyaan dulmar ku saabsan habraac kasta oo laga yaabo inuu khuseeyo codsigaaga Ilaalinta Caalamiga ah. Marka uu socdo habka codsigaaga Ilaalinta Caalamiga ah, waa inaad dib u daawataa

fiidiyowyada sharxaya habraaca (ama habraacyada) ay **IPO** go'aamiso inay khuseeyaan codsigaaga.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa talo sharci adigoo adeegsanaya QR Code-ka hoose, adigoo taga xafiiska soo dhaweynta ee **LAB Citywest Legal Counselling Service**, ama onlayn adigoo booqanaya:

<https://internationalprotection.legalaidboard.ie/>



Marka labaad:

2. Kulamada La-talinta (Clinics)

Kulamada la-talintu waxay dhici doonaan maalin kasta (Isniin ilaa Jimce, 10:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo) meel gaar ah oo ku taal Citywest, halkaas oo aad fursad u heli doonto inaad su'aalo weydiiso oo aad codsato sharaxaad dheeraad ah.

Kulamada waxaa joogi doona shaqaale sharci, iyadoo adeegyo turjumaad la heli doono, si ay uga jawaabaan su'aalahaaga una siiyaan caawimo.

Ka qaybgalka kulamadu qasab ma aha, balse waa lagu dhiirigelinayaa si loo hubiyo inaad fahamto habraacyada, xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga.

Waxaad ka heli kartaa jadwalka kulamada, kaas oo toddobaad kasta la cusboonaysiin doono, adigoo adeegsanaya QR Code-ka hoose ama adigoo booqanaya bogga internetka:

<https://internationalprotection.legalaidboard.ie/>



Talo Sharci iyo Matalaad Sharci

Talo sharci iyo matalaad sharci (oo sidoo kale loo yaqaan legal aid) waxaa bixiya qareenno. Waa inaad sida ugu dhakhsaha badan u codsataa kaalmo sharci si aad u hesho talo sharci iyo matalaad. Waxaad ka codsan kartaa kaalmo sharci **Citywest Convention Centre** ee **Legal Aid Board Citywest Counselling Service**, ama mid ka mid ah saddexda xarumood ee

sharciga ee ku yaal: (1) Dublin (Smithfield), (2) Cork (Pope's Quay), iyo (3) Galway (Woodquay).